



Robert McKean
Interim Superintendent

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Office of the Superintendent

501 North Dixon Street • Portland, OR 97227

(503) 916-3200 • superintendent@pps.net

Qoysaska iyo Bulshada PPS ee Qaaliga ah:

Dugsiyada Portland waxay aad ugu baahan yihiin dacaytir. Intooda badan waxaa la dhisay ka hor Dagaalkii II ee Adduunka, iyadoo kuwo badan oo ka mid ahi ay u baahan yihiin dib u cusboonaysiin iyo hagaajin si ardayda loo siiyo jawi waxbarasho oo casri ah iyo si wax looga qabto xaaladaha aan badbaadada ahayn. Baaritaan la sameeyay xagaagii la soo dhaafay wuxuu muujiyay in boqolkiba 99 ay dugsiyadeenu ugu yaraan leeyihiin hal tuubada biyaha qabow qaada oobaaritaankii la sameeyay lagu ogaaday in ay leedahay qiyaas ka saraysa heerarka EPA ee kiimikada lead ee la aqbali karo. Kuwo badan oo ka mid ah saqafyada dugsiyadeena ayaa dhaafay wakhtigii ay waxtarka yeelan lahaayeen, iyagoo qaarka mid ah ay si joogta ah biyuhu uga soo daataan. Nidaamyada badbaadada dabka ee dusgiyada intooda badan ayaa ah kuwo aan ku filnayn, iyadoo 42 ka mid ah dugsiyada PPS aanay lahayn nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo haddii ay dhacdo in uu dab kaco.

Toddobaadkan, shaqaalahaa Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa fursado dhowr ah oo la kala dooranayo oo loogu talagalay Maalgelinta Daymeed ee Caafimaadka, Badbaadada, iyo Casriyeenta ee Maajo 2017-ka u soo bandhigay Guddiga Waxbarashada, taasi oo sii wadi doonta [qorshaha muddada dheer](#) si loo casriyeeyo isla markaana loo kordhiyo caafimaadka, badbaadada, iyo jawiga waxbarasho ee dugsi kasta iyadoo la adeegsanayo lacago deyn ah oo lagu maalgelinayo dhismaha.

Maalgelinta daymeed ee Maajo 2017-ka waxaa lagu casriyeyn doonaa Dugsiyada Sare ee Benson, Lincoln, iyo Madison iyadoo ay dhici karto in la dayactiro isla markaana dib loo furo Dugsiga Dhexe ee Kellogg si loo yareeyo buux dhaafa ka jira Koonfurta-bari ee Portland. Maalgelintan daymeed waxaa sidoo kale lagu maalgelin doonaa arrimaha la xiriira caafimaadka muhiimka ah iyo badbaabada ee u baahan in wax laga qabto ee dugsiyada baahida degdega ah qaba—sida kiimikada lead ee ku jirta tuubooyinka biyaha, qaybaha kala ee ay tuubadu ka kooban tahay, iyo rinjiga, soo gaaridda maadada asbestos, badbaadada dabka, iyo gelitaanka dugsiga ee dadka naafada ah.

Waxaan maanta kula wadaagaynaa [faahfaahinta laba ah maalgelinta daymeed oo la kala dooranayo](#), iyo sidoo kale [macluumaadka taariikheed](#) ee mashaariicda casriyeenta iyo [baahiyaha dheeraadka ah ee caafimaadka iyo badbaabada](#), iyo natijjooyinkii ka soo baxay [ra'yi ururintii fikradaha dadweynaha lagu waydiinay ee degmada](#).

Waxaan kugu marti qaadanaynaa in aad fikradaada la wadaagto Guddiga iyagoo go'aan ka gaaraya maalgelinta deynta ah ee isla socota si ay ugu gudbiyan cod bixiyayaasha. Waxaa jira siyaabo dhowr ah oo looga qayb qaadanayo:

- Ka qayb qaado ra'yi ururinta internet-ka [laga buuxinayo](#), ee furan ilaa Febraayo 9keeda
- Ka soo qaybgal Kulanka Dadweyne ee ka dhacaya Hoolalka Shirarka si aad u ogaato waxyaalo dheeraad ah oo la kala dooranayo, isla markaana u dhiibato fikrad:
 - Febraayo 2, 6:30 galabnimo, Maqaayada Dugsiga Sare ee Madison (2735 NE 82^{-naad})
 - Febraayo 7, 6:30 galabnimo, Qolka Muusikada ee Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson (546 NE 12^{-naad})
 - Febraayo 8, 6:30 galabnimo, Maqaayada Dugsiga Sare ee Lincoln (1600 SW Salmon)
 - Febraayo 9, 6:30 galabnimo, Maqaayada Dugsiga Sare ee Roosevelt (6941 N Central)
- Ka markhaati kac dacwad dhageysi dadweynaha ee maalgelinta daymeed ee Guddiga:
 - Febraayo 6, 6 galabnimo, BESC (501 N. Dixon)
- Fikradda aad qabto email ahaan ugu soo dir bond2017@pps.net

Baahida xarumaheenu waa kuwo ballaaran, iyadoo fikradda bulshadu ka qabto maalgelinta daymeed ee la kala dooranayo ay qaabayn doonto mudnaanta ay kala leeyihiin wareega xiga ee maalgelintu. Naga caawi sidii aan mustaqbalkeeda si wadajir ah ugu dhisi lahayn.

Waad mahadsan tahay,

Bob McLean
Maamulaha Ku meel gaarka